9

QOD.20AAD EEDEYNTA & GUDBINTA EEDA.

- a) Baadhista Hantidhawrku sameeyey haddii ay ka soo ifbaxaan dambi ciqaabeed, waxaa hantidhawrku ka diyaarinayaa Gal-dacwadeed waxaanu u gudbinayaa Xeerilaalinta galdacwadeedkaas.
- b) Xeerilaalintu markay hesho gal dacwadeedka Hantidhawrka Haddii uu ku qanco dacwaddaas wuxuu fulinayaa ooggidda eedda, si waafaqsan qodobadda 70^{aad} iyo 71^{aad} ee X.H.C.

QOD.21AAD. FULINTA DACWADAHA HANTIDHAWRKU SOO OOGGO.

- a) Dacwadaha Hantidhawrku soo ooggo ee ku sheegan qodobka **70^{aad}** iyo qodobka **71^{aad}** X.H.C. lama joojin karo.
- b) Dacwadaha Hantidhawrku soo gudbiyo marku Xeerilaaliyaha Dacwaddu khusaysaa ka helo galdacwadeedka Hantidhawraha Guud, haddii uu u arko inuu dambi ku cad yahay cidda lagu eedeyey wuxuu xeerilaaliyuhu eedeysanaha horgeynayaa Maxkamadda awooda u leh dambigaas.
- c) Haddii xeer ilaaliyuhu u arko inay eedda wax ka dhiman yihiin wax uu qoraal u gubinayaa Hantidhawrka, isagoo sheegaya waxyaalaha ka dhiman eedda, si Hantidhawrku u soo dhamays tirona waxa Xeerilaaliyuhu Eedeysanaha horgeynayaa Maxkamadda qaadida dacwadaas awood u leh.

QOD.22AAD. AWOODDA HANTIDHAWRKA GUUD.

Hantidhawraha Guud, kuxigeenada Hantidhawraha Guud, iyo Shaqaalaha Hantidharku markay fulinayaan waajibaadka hawleed ee sharcigu faraayo waxay si toosa oo cad u leeyihiin awoodaha hoos ku qoran:-

- a) Inay baadhaan goob kasta oo uu ka jiro maamul Dawladeed oo ku lug leh maamul lacageed/Hantiyeed, baadhaanna Diiwaanada, Buugaagta, Dokumintiska Xisaabeed, lacagta caddaanka ah, tigidho, khasnadaha, makhaasinadda, iyo lacagta la kharash gareeyey ee raad ku yeelata fal dambiyeedku soo galo meel dadweyne waxay adeegsan doonaan Boliiska Qaranka.
- b) In haddii ay baadhis Xisaabeed kula kulmaan faldambiyeed cad waxay awood u leeyihiin in ay xidhaan Eedeysanaha sharcigana ku horgeeyaan muddo 48 saac gudahood ah sida ku xusan qodobka 24aad ee X.H.C.
- c) Waxay u yeedhan karaan in ay yimaadaan Xafiiska Hantidhawrka Guud ama yimaadaan goob Hawli uga socoto qof kasta si ay uga waraystaan xogogaalnimo ku saabsan meelaha sharcigu u ogol yahay inay baadhaan. Ciddii leh dhawrsanaanta sharci waxa ay ula xidiidhayaan sida uu yahay sharciga dhawrsanaantu.

Law on the Office of the Auditor General of the State - Law No. 5/98

www.somalilandlaw.com

- d) Way baadhi karaan, baadhis awgeedna way u qaadan karaan dokumintis xisaabeed ama dokomintis maamul oo ah maraga muujin dambi cid kasta oo leh.
- Cid kasta waxa ku waajib ah in ay Hantidhawrka gacan ku siiyaan gudashada waajibkooda.
 - f) Boliisku waa in ay gacan siiyaan Hantidhawrka haddii ay u baahdaan markay gudanayaan waajibaadkooda xileed.
 - g) Hantidhawrku wuxuu awood u leeyahay inuu ku xidho warqad cad (seal) xafiis kasta oo dawladdu leedahay, meel kasta oo hanti dawladeed taal, ama meel kasta oo Dawladeed oo uu tuhun ka galo markay baadhista ku jiraan.
 - h) Ciddii jarta warqadda (Seal) wuxuu mutaysanayaa ciqaab isagoo Maxakamadda loo gudbin doono.

QOD.23AAD. DHAWRSANAANTA MADAXDA H/DHAWRKA GUUD.

- a) Hantidhawraha Guud iyo ku-xigeennada Hantidhawraha Guud lama xidhi karo haddaan ogolaansho laga helin Madaxweynaha JSL.
- b) Madaxda faqradda (B) ku xusan ee qodobkan, waa la qaban karaa haddii la helo iyagoo dambi faraha kula jira.

QOD.24AAD. LAALID.

Sharci kasta, ama xeer kasta oo ka soo horjeeda sharcigan, ama aan la socon Karin waa la laalay.

QOD.25AAD. DHAQAN-GALKA.

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxeexo Madaxweynaha JSL.

ALLAA MAHAD LEH

(Axmed Maxamed Aadan) Guddoomiyaha Golaha Wakiilada.

(Maxamed Xuseen Cismaan) Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada.